



XAFIISKA MADAXA NABADGALYADA EE DEGMADA SAN DIEGO

OGEYSIISKA GANACSIYADA IIBIYA TAFARIIQDA MARIJUANA, HEMP, IYO MAADOOYINKA XASHIISKA LA SIFEEYAY

Oktoobar 2024

Gobalka California ayaa ogolaanaaya iibinta maadooyinka xashiiska iyo kuwa xashiiska laga sameeyay si loogu dhaqmo sharciga gaarka ah iyo shuruudaha ruqsada. Wuxuu ogaaday Xafiiska nabadgalyada ee degmada San Diego in laga yaabo in ganacsigaagu uu iibiyo maadooyin kasoo horkeeda sharciyada ayna ku jiraan laakiin kuma koobna kuwa ku cad Sharciga Baarlamaanka California ee 45 (2021) iyo sharciyada xaalada degdega ah ee Gudoomiyaha gobalka oo lagu mamnuucay maadooyinka hemp ee ay ku jirto THC (2024).

Ganacsiyada xashiiska ee California ayaa sharcigu maamulayaa si loo xaqiijiyo in ganacsiyadu ay iibiyaan keliya agabka sharciga ah, la baaray, oo badqabka leh. Badqabka macaamiisha ayaa ah muhiimadda koobaad. Marka laga soo tago sharciyada xashiiska, hemp ka ganacsiyada ayaa sidoo kale la xakameeyaa. Iibinta maadada xashiiska sharci darada ah ama maadada hemp ee sharci darada ah ayaa danbi lagu mutaysan karaa sharciga gobalka iyo sharciga maxaliga ah waxaana lagu marsiin karaa ganaaxyo dheeri ah oo madani ah.

Xafiiska Nabadgalyada ee Degmada San Diego wuxuu doonayaa inuu qaado talaabada koobaad oo wacyi gelin ah, si tafaariiqleydu ay u ogaadaan sharciyada cusub. Maadooyinka lagu calaamadiyay "ka samaysan hemp" ayaa lahaan kara maadooyinka dhab ahaantii aad uga duwan waxa ku qoran baakada ama ku qoran shahaadada la baxshay. Agabka lagu qoray tilmaanta khaldan waa cilad dhanka badqabka dadwaynaha ah, waxayna u badan tahay inay sharci daro yihiin. Tafaariiqleeyda waxaa lagu boorinayaa inay raadsadaan baaritaanka shaybaarka madaxa banaana si loo hubiyo in agabka shayga ay si sax ah ugu qoran yihiin tilmaanta badeecada. Si qaab wayn loogu yeraayo masuuliyada ku dhici karta ganacsiga, aad ayaa loogu boorinayaa ganacsiyada inay xaqiijiyaan maadooyinka agabka laga iibinaayo dadwaynaha.

Xafiiska Nabadgalyada ee Degmada San Diego ayaa codsanaaya in ganacsigaaga tafaariiqda iibiya uu shaaciydo xashiis kasta oo sharci daro ah ama maadooyinka hemp ama uu ku wareejiyo Xafiiska nabadgalyada ee degmada San Diego si uu qashinka ugu daro 30 maalmood ee soo socda gudahood. Talaabada fulinta ayaa la qaadi karaa, sida haboon, kadib ogeysiiskan. Qof kasta oo doonaaya inuu soo wareejiyo alaab loo arko kuwo sharci daro ah ayaa u geyn kara Saldhiga Ilaallada Nabadgalyada.

Marna agabka xashiishka ama maadooyinka xashiishka laga sameeyay laga iibin karin ilmaha yaryar ee kayar 18 sano. Ka iibinta xashiishka ilmaha yaryar waa danbi wayn sida ku cad Xeerka Caafimaadka iyo Badqabka qaybta 11361(b). Ganacsi kasta oo la ogaado inuu ka iibinaayo maado ay ku jirto agabka sharci daro ah ilmo yar ayaa laga qaadi doonaa talaabo sharci fulin oo degdeg ah.

Sheriff Kelly A. Martinez
Xafiiska nabadgalyada ee Degmada San Diego

Falan kala xiriir Xafiiska nabadgalyada ee Degmada San Diego ciwaanka marijuanaenforcement@sdsheriff.gov si aad u hesho caawimaad dheeri ah ama www.sdsheriff.gov/resources/THC si aad u hesho xog dheeri ah.